



## Waa maxay sababta aan idiinku mahadcelinayaa?

Waxa aan ku soo dhawaaneynaa bishii saddexaad intii aan shaqada Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland aan hayey, iyada oo aan dhihi karo in ay isbarashadii aan isbaraneyn ahayd mid ay ku dheehneyd firficooni weyni, shirarkii aan ku kulmeynay, urursigii aan urursanayey macluumaadka iyo hawlihii shaqo oo iyaguna u socday si laxaadle, maamulka degmada. Haddaba, iyada oo aynu u baxayno dhammaadka todobaadka fasaxyo ciido, waxa aan arkay aniga oo ka fikiraya sida aan ugu faraxsanahay waxyaabo fara badan oo leh wax weyn iyo wax yarba.

Waa marka hore e, waxa aan ku faraxsanahay shaqada aan ka helay dugsi degmada iyo magaalo aad daryeel qoto dheer u leh dugsiyada dadweynaha iyo waliba waxbarashada ilmahooda. Waxa aanu nahay bulsho iyadu rabta in ay ka qeybtaan sidii aanu iskuuladayadu ay u guuleysan lahaayeen iyada oo ay taasi tahay wax loo dabaaldego.

Waxa kale oo aan ku faraxsanahay daryeelka iyo naf hurnimada macallimiinta iyagu fasaladooda masuulka ka ah, maamulayaasha kuwaas oo u dejiyey qaab gaar ah iskuul kasta, iyo dhammaan taageerada shaqaalaha cajiibka ah ee hubiya in ay ardaydeenu ku sugnaadaan nabadgelyo, lana quudiyo cunto, ka dibna diyaar ah inay wax bartaan. Run ahaantii waxa aan aad ugu faraxsanahay ardaydeena, hadday tahay gabarta yar ee xannaanada bilowga ah ee rabta inay barato sida loo akhriyo buugoodii ugu horeeyey ama ardayda ku jirta fasalka 12naad ee ku hawlan isla markaana ku faraxsan inay tagayaan waxbarashadoodii jaamacada ama qorsheynaya xirfadahoodii shaqo ee qaban lahaayeen.

Ugu dambeyntii, waxa aan jecelahay inaan idinla socodsiiyo sida aan la koobi karin ee aan ugu faraxsanahay in aan wada joogno xaaskeyga( oo ah macallimad wax u dhigta fasalka labaad) iyo qoyskeyga oo aan ku wada damaashaadi doono dhowrka maalmood ee la nasanayo iyada oo aan wax badan ka baran doono magaaladan Portland.

Dhammaantiin waad mahadsan tihiin.

Guadalupe